

**HADDII AY CABSII KU HAYSO AMA AAD KHATAR KU JIRTO,  
WAXAAD WACDAA LAMBARKA 911**

**HAGGAHA MAXKAMADDA EE  
DEGMADA FRANKLIN COUNTY  
IYO MAGAALADA COLUMBUS:  
MACLUUMAAD KU SABSAN  
WEERARKA GALMADA,  
BUDHCADNIMADA GURIGA IYO  
DABA-GALKA**



***WAXA DIYAARYEY:***

**RON O'BRIEN, QAREENKA DACWAD-OOGIDDA EE DEGMADA  
FRANKLIN COUNTY**

**IYO**

**RICHARD C. PFEIFFER JR., QAREENKA MAGAALADA COLUMBUS**

- 'ASHA Ray of Hope' - (614) 326-2121  
[www.asharayofhope.org](http://www.asharayofhope.org)
- Adeegyada Komuyuunatiga Aasiyaanka Ameerikaanka ah -  
(614) 220-4023  
[www.aacsohio.org](http://www.aacsohio.org)
- 'BRAVO' (Ururka Ka-hortagga Gacan-saarka 'Buckeye Region  
Anti Violence Organization') - (614) 294-7867  
[www.bravo-ohio.org](http://www.bravo-ohio.org)
- Barnaamijka Booqashooyinka iyo Isweydaarsiga ee Beerta Weyn  
ee Buckeye - (614) 594-9017  
[www.buckeyeranch.org/Visitation\\_and\\_Exchange.html](http://www.buckeyeranch.org/Visitation_and_Exchange.html)
- Kiliniga U-dooddidda Qoyska ee Dugsiga Sharciga ee Jaamacadda  
'Capital' - (614) 236-6779  
[www.law.capital.edu](http://www.law.capital.edu)
- Xarunta Amaanka iyo Bogsashada Qoyska - (614) 722-8200  
[www.nationwidechildrens.org/ccfa](http://www.nationwidechildrens.org/ccfa)
- 'CHOICES' (Khadka 24-saac ee Budhcadnimada Guriga) -  
(614) 224-4663  
[www.choicescolumbus.org](http://www.choicescolumbus.org)
- Unnuga Budhcadnimada Guriga & Daba-galka ee Xafiiska Dacwad-  
oogaha Magaalada Columbus - (614) 645-6232  
[www.columbuscityattorney.org](http://www.columbuscityattorney.org)
- Xafiiska Dacwad-oogaha Magaalada Columbus - (614) 645-7483  
[www.columbuscityattorney.org](http://www.columbuscityattorney.org)
- Qeybta Booliska ee Columbus (arrimaha aan degdega ahayn) -  
(614) 645-4545  
[www.columbuspolice.org](http://www.columbuspolice.org)
- Unugga Budhcadnimada Guriga ee Qeybta Booliska ee Columbus -  
(614) 645-7225
- Xafiiska Dhibannayaasha Gaarka ah ee Qeybta Booliska ee Columbus -  
(614) 645-4701
- Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Columbus - (614) 645-7772  
[www.publichealth.columbus.gov](http://www.publichealth.columbus.gov)
- Barnaamijka Caawinta Dhibbanayaasha ee 'Columbus Urban  
League' - (614) 257-6300  
[www.cul.org](http://www.cul.org)

- Ururka Dhagoolayaasha Adduunka ee ka soo horjeeda Budhcadnimada Meelkastaba (DWAVE) - talafoonka fiidyowga ah: (614) 678-5476 or (877) 425-0148  
Cod, Fagas TTY: (614) 670-8796  
[www.dwaveohio.org](http://www.dwaveohio.org)
- Adeegyada Ilmaha ee Degmada Franklin County - (614) 229-7000  
[www.franklincountyohio.gov/children\\_services](http://www.franklincountyohio.gov/children_services)
- Karaaniga Maxkamadaha ee Degmada Franklin County
  - \* Maxkamadda Dawladda Hoose - (614) 645-8186  
[www.fcmclerk.com](http://www.fcmclerk.com)
  - \* Maxkamadda Cabashooyinka Caadiga ah, Qeybta Dembiyada - (614) 525-3650  
[www.franklincountyohio.gov/clerk/cio.cfm](http://www.franklincountyohio.gov/clerk/cio.cfm)
  - \* Qeybta Rayidka - (614) 525-3621
  - \* Xiriirka Guriga - (614) 525-4410
- Xafiiska Qareenka Dacwad-oogidda Degmada Franklin County - (614) 525-3555  
[www.franklincountyohio.gov/Prosecuting\\_Attorney](http://www.franklincountyohio.gov/Prosecuting_Attorney)
- Unugga Caawinta Markhaatiga Dhibanaha ee Xafiiska Qareenka Dacwad-oogidda Degmada Franklin County - (614) 525-3555  
[www.franklincountyohio.gov/Prosecuting\\_Attorney/victimwitnessunit.cfm](http://www.franklincountyohio.gov/Prosecuting_Attorney/victimwitnessunit.cfm)
- 'Sheriff'ka Degmada Franklin County (arrimaha aan degdega ahyn) - (614) 525-3333  
[www.sheriff.franklin.oh.us](http://www.sheriff.franklin.oh.us)
- 'Sheriff'ka Degmada Franklin County, Xafiiska Dembi-baarista - (614) 525-3350  
[www.sheriff.franklin.oh.us](http://www.sheriff.franklin.oh.us)
- 'Hands on Central Ohio' - (614) 221-6766 OR 211  
[www.handsoncentralohio.org](http://www.handsoncentralohio.org)
- 'Huckleberry House' - (614) 294-5553  
[www.huckhouse.org](http://www.huckhouse.org)
- Adeegyada Qoyska ee Yahuudda/ Xarunta Dhibannayaasha Jir-dilka - (614) 231-1890  
[www.jfscolumbus.org](http://www.jfscolumbus.org)
- Ururka Kaalamada Sharciga 'Legal Aid Society' - (614) 224-8374  
[www.columbuslegalaid.org](http://www.columbuslegalaid.org)

- Barnaamijka Caawimada Dembiyada iyo Argagaxa ee Mt. Carmel - (614) 234-5900  
[www.mountcarmelhealth.com/programs-services/crime-trauma-assistance](http://www.mountcarmelhealth.com/programs-services/crime-trauma-assistance)
- 'Net Care Access' (adeegyada caafimaadka maskaxda ee 24-saac) - (614) 276-2273  
[www.netcareaccess.org](http://www.netcareaccess.org)
- Guddiga Ohio ee Arrimaha Dadka 'Hispanic' & 'Latino'ga - (614) 466-8333  
[www.ochla.ohio.gov](http://www.ochla.ohio.gov)
- Isbahaysiga Dadka 'Hispanic'a ee Ohio - (614) 840-9934  
[www.ohiohispaniccoalition.org](http://www.ohiohispaniccoalition.org)
- Barnaamijka Magdhowga Dembiyada ee Ohio - 1-800-584-2846 OR (614) 466-5610  
[www.ohioattorneygeneral.gov/Services/Victims/Victims-Compensation-Application](http://www.ohioattorneygeneral.gov/Services/Victims/Victims-Compensation-Application)
- Khadka Kufsiga ee SARNCO (24-saac) - (614) 267-7020  
[www.ohiohealth.com](http://www.ohiohealth.com)
- Isbahaysiga Hawwenka & Ilmaha ee Soomaalida - (614) 473-9999  
[www.swaca.org](http://www.swaca.org)
- 'Southeast, Inc.' - (614) 225-0990  
[www.southeastinc.com](http://www.southeastinc.com)
- Khadka Ka-hortagga Is-dillidda ee 24-saac - (614) 221-5445
- 'VINE' (Macluumaadka Dhibanaha & Oggeysiinta ee Maalin Walba) - 1-800-770-0192  
[www.vinelink.com](http://www.vinelink.com)

Weerarka galmada, budhcadnimada guriga iyo daba-galku waa ficillo loogu talagalay in lagu bajiyo, dhaawaco, bah-dilo, la qiimo tiro, la dulbaxo oo la kantaroollo qof kale. Haddii wax sidan oo kale ihi adiga kugu dhaceen, waxa muhiim ah inaad xasuusato wax kasta oo aad sameysay ama aanad sameynin, in aanay adiga khaladkaaga ahayn. Qofka aadiga tan kugu sameeyey ayaa eedeeynta iska leh; adiga uma qalantid taas ama ma aanad warsan ama weydiisan in lagugu sameeyo. Waxa laga yaabaa inaad tahay dhibbane dembi.

**Haddii aad tahay dhibanne dembe, waxaad leedahay xuquuq.**

Macluumaadka soo socda waxa loogu tala-galay inuu noqdo hage aasaasi ah ee dhibbanayaasha dembiyada gacan-saarka ee Degmada Franklin County. Weerarka galmada, budhcadnimada guriga iyo daba-galku waa dembiyo gacan-saar ah oo inta badan laga galo haweenka, ragga iyo ilmaha.

Dhibbanayaasha dembigu inta badan waxay ka cabsadaan inay ka hadlaan wixii iyaga ku dhacay. Waxa laga yaabaa inaanay hubin sida ay maxkamaduhu u shaqeeyaan, ama inay ka cabsayaan waxa ku dhici doona iyaga, qoysaskooda, ama dembi-falaha. In kasta oo kuwaasi yihiin cabsiyo la arko inta badan oo caadi ah, **waxa jira meelo aad caawimo ka raadsan kartid haddii aad ahayd dhibbane weerar galmo, budhcadnimo guri iyo daba-gal.**

Intaas waxa dheer, in hay'adaha halkan ku liis-gareysani ay u debeansan yihiin arrimaha dhaqanka oo ay leeyihiin khibrad ay kula shaqeeyeen dadyow kala duwan. In kasta oo ay sharciga ixtiraamayaan, waxay isku deyi doonaan inay adiga ku siiyaan adeegyo ama ay kuu diraan barnaamijyo xaaladdaada yaqaanna.

Buug-yarahan looguma tala-gelin inuu noqdo hagge buuxa ee agabka kumuunatiga ah. Dhibanayaasha dembiyada waxa si xoog leh loogu dhiirigelinayaa inay kala xiriiraan hay'adaha lagu sheegay buug-yarahan wixii macluumaad dheeraad ah iyo agabyada dirrida 'referral' ee komuyuunatiga.

Dhibane ahaan waxa laga yaabaa inaad u qalantid inaad magdhow ka heshid Barnaamijka Magdhowga Dembiyada ee Dhibanayaasha Ohio. Wixii macluumaad dheeraad ah, si toos ah ula xiriir barnaamijkan.

**Xasuusnow – adigu mas'uul kama tihid dabecadda dembi falaha oo ma kantarooli kartid ama ma beddeli kartid dabecaddooda.**

**Weerar Galmo 'Sexual Assault':** Weerar galmo wuxuu dhacaa marka qof adiga kugu qasbo ama kugu kalifo inaad la sameyso galmo ka hor imaneysa rabitaankaaga (iyadoon la helin oggolaashahaaga).

**Budhcadnimo Guri 'Domestic Violence':** Budhcadnimada Gurigu waxay dhacdaa marka afadaada/seygaaga, lammaanahaaga soke, ama qoyska, ama xubin ka mid ah guriga uu kugu handadu kalmado iyo/ama hub, isku dayo inuu sababo, ama sababo dhaawac jirkaaga ah (tusaale ahaan: garaacid, dhirbaaxid, feerid, laaddid, qaniinid ama ceejin).

**Daba-galka 'Stalking':** Daba-galku wuxuu dhacaa marka ficillada qof ee soo noqnoqdaa ay adiga kuu keenaan maskax xannuun iyo/ama cabsi dhaawac jireed (tusaale ahaan: wey ku daba-galaan, wey ku wacaan, wey kuu hanjabaan, ama wey kula soo xiriiraan si soo noqnoqosha ah).

**Dhammaan kuwa kor ku qoran waxa loo heystaa inay yihiin dembiyada gacan-saarka. Haddii aad adigu tahay dhibbane mid ka mid ah dembiyadan ama dembi gacan-saar oo kale, waxaad hubisaa inaad aamaan tahay jir ahaan oo wac lambarka 911. Haddii adiga lagu dhaawacay, waxaad doonataa daaweyn oo dhakhtarka aad.**

**HADDII AAD AHAYD DHIBBANE WEERAR GALMO**

- Waxaad doonataa xannaano daawo ah oo ka raadso qolka daawada degdega ah (emergency department) wixii dhaawac adiga ku soo gaaray (ama laga yaabo inaanad ogeyn inuu ku gaaray). Shaqaalaha waaxda daawada degdega waxa kale oo ay aruurin doonaa wixii caddeymo jireed ah, oo waxay qori doonaan wixii dhaawac ah haddii aad adiga doonto in sidaas la sameeyo.
- Waaxyaha daawada degdega ah intooda badani waxay bixiyaan adeegyo buuxa oo taageero oo ay siiyaan dhibbanayaasha weerarka galmada. Waaxyaha daawada degdega ah intooda badani waxay leeyihiin **Kalkaalisooyin Baara Weerarka Galmada (Sexual Assault Nurse Examiners) (SANE's)**, kuwaas oo si gaar ah loogu tababaray cilmiga dembi-baarista kalkaalisada iyo aruurinta caddeymaha, iyo **u-dooddayaal tabaruciin ah**, oo ku takhasusay taageeraada samatabaxayaasha weerarka galmada. Labadaasiba waxay adiga kaa caawin karayaan maritaanka habka cisbitaalka.
- Sida ugu fiican ee loo heli karo natiijooyin fiican ee aruurinta caddeymaha waa: **HA** qubeysan ama ha meyraniin, biyo xoog leh ha ku shubin barta jirka (douche), ha cadayan ilkahaaga, ha tagin musqisha, ha cabin sigaar, ama ha beddelin dharka ka hor intaadan tagin cisbitaalka. Haddii ay noqoto inaad iska beddeshid dharka, waa inaad soo qaaddaa oo aad keentaa dharkii aad xirneyd waqtigii weerarka.
- **Haddii aad tahay dhibanne weerar galmo, waxaad la xiriirtaa 'Sexual Assault Response Network of Central Ohio (SARNCO)' ee Khadka Caawimada Talafoonka ee 24ka Saac ee (614) 267-7020, ama si lacag la'aan u wac xafiiska 'Rape, Abuse & Incest National Network (RAINN)' ee 1 800-656-HOPE.**

Degmada Franklin County, kiisaska dembiyada ah waxa lagu dhageystaa labadan midkood:

- Maxkamadda Dawladda Hoose ama Munishiibiyada ee Degmada Franklin County – maxkamaddani waxay ka mas'uul tahay kiisaska dembiyada yaryar.

- Maxkamadda Qirashooyinka Caadiga ah – maxkamaddani waxay ka mas'uul tahay kiisaska dembiyada waaweyn.

Haddii aadan hubin inaad tahay tahay dhibbane dembi yar ama dembi weyn, waxaad wici karta labada xafiis ee Dacwad-oogaha ee liis-gareysan. Marka aad soo wacayso waa inaad taqaannaa magaca eedeysanaha ama lambarka kiiska.

◇ **U-doode xagga sharciga ama kaaliye marqaati dhibbane** ah ayaad heli doontaa inay adiga kaa caawiyaan dhammaan habka maxkamadda.

### WAA MUHIIM:

- Mar kasta dhar habboon u soo xiro maxkamadda! Haddii aad shakisantahay, waxaad wacdaa dacwad-oogahaaga ama kaaliyaha markhaati dhibbane ah.
- Isku dey inaad heshid qof kuu haya ilmaha marka aad maxkamadda ku jirtid, ama qof kale oo ilmaha kuu eegga soo kaxeeyso. Xaakimada qaarkood ayaan oggoleyn in ilmuhu soo galaan qolka maxkamadda. Waxa intaas ka sii muhiimsan, macluumaadka qaarkiis ee lagaga dhex hadlayo maxkamadda wuxuu waxyeeli weyn gaarsiin karaa ilmaha.
- Haddii aad daneyneysid inaad heshid Amar Illaalineed (Protection Order), fadlan waxaad ka fiirisaa Bogga 16 macluumaad intan ka dheer.
- Haddii aad u baahatid turjubaan, mid baa lagu qaban doonaa.

## HADDII AAD AHAYD DHIBBANE BUDHCADNIMO GURI

- Haddi aad tahay dhibbane budhcadnimo guri, wac booliska ama Unugga Budhcadnimada Guriga iyo Daba-galka ee Xafiiska Dacwad-oogaha Magaalada Columbus ee (614) 645-6232, Isniin illaa Jimce 8:00 subax illaa 4:30 galab.
- **Adiga amaankaaga iyo kan ilmahaaga ayaa wax kasta oo kale ka muhiimsan. Haddii aad ka cabsi qabtid in seygaaga/afadaada ama lammaanahaaga laga yaabo inuu/inay ku dhaawaco/dhaawacdo – waxaad suubsataa qorshe amaan aad ku nabad-gasho:**
  - ◇ Wac khadka 24ka Saac ee 'CHOICES' ee (614) 224-4663.
  - ◇ Qorsheyo meel kale oo aad tagto haddii seygaaga/afadaada ama lammaanahaagu kuu hanjabo ama ku dareensiyo inaad tahay amaan la'aan. U tag qof daris ah, saaxiib ama xubin ka mid qoyskaaga oo aad ku kalsoon tahay inuu idin caawinayo adiga iyo ilmahaaga.
  - ◇ Qabso albaab ama daaqad aad si degdega oo amaana uga baxdo oo aad uga baxsato.
  - ◇ Ha ka hor imanin ama ha isku taagin seygaaga/afadaada ama lammaanahaaga haddii uu/ay sarkhaansan yahay/tahay ama uu/ay isticmaalay/isticmaashay daroogo.
  - ◇ Waxaad isku deydah inaad meel kale dhigato lacag kaash ah, dhar dheeraad ah, furayaal dheeraad ah ee guriga iyo gaariga, iyo wixii dhokumanti muhiim ah ee adiga iyo qoyskaaga (Tusaale ahaan: Kaarka 'social security'ga, warqadaha dhalashada, dhokumantiga furitaanka, baasboorada, fiisooyinka iyo waraaqaha socdaalka). Haddii aad dooneysid inaad si degdega uga tagtid guriga, waxaad ka fakartaa meesha aad waxyaalahaas si amaan ah ugu heyn kartid (lacalla gugira saaxiibkaa, qaraabadaa ama jiiraankaaga).

## HADDII AAD AHAYD DHIBBANE DABA-GAL

- Waxaad wacdaa booliska oo warbixin sii mar kasta oo taasi dhacdo.
- La xiriir **Unugga Budhcadnimada Guriga iyo Daba-galka ee Xafiiska Dacwad-oogaha Magaalada Columbus ee (614) 645-6232**, Isniin illaa Jimce 8:00 subax illaa 4:30 galab.
- Ha tuurin waxyaalaha caddeyn loo isticmaali karo. Heyso dhammaan waraaqaha, farriimaha qoraalka ah 'text messages', farriimaha codka 'voicemails', iwm.

**U-FIIRSO:** Haddii boolisku dacwad soo oogo, waxaad heerka kiiska ka oggaan kartaa adoo la xiriiraya xafiiska Karaaniga Maxkamadaha Degmada Franklin County. Haddii aanu boolisku dacwad soo oogin, ama adigu aanad hubin in dacwad la oogay, waxaad la xiriirta Unugga Budhcadnimada Guriga iyo Daba-galka ee Xafiiska Dacwad-oogaha Magaalada Columbus.

## TALAABOOYINKA DACWAD-OOGIDDA DEMBI YAR 'MISDEMEANOR'

Dacwooyinka dembiyada yaryar waxa laga yaabaa inuu boolisku soo oogo, oo boolisku u diro Xafiiska Dacwad-oogaha Magaalada (Waaxda Kiis Qabashada) inuu xareeyo dacwad dembi weyn ah 'criminal complaint'. Dembi yar waa dembiga ciqaabta ugu weyni gaareyso 6 bilood oo jeel ama xarig ah iyo/ama \$1,000 doolar oo ganaax ama taqsiir ah.

Kiisaska dembiyada yaryar waxa dacwadda ku soo oogga:

Xafiiska Qareenka Magaalada Columbus,

Qeybta Dacwad-oogaha

375 S. High St., 7<sup>th</sup> Floor

Columbus, Ohio 43215

(614) 645-7483

www.columbuscityattorney.org

Fadlan wac Xafiiska Dacwad-oogaha Magaalada si aad u oggatiid saacadaha ay shaqeyso Waaxda Kiis Qabashada.

Marka eedeysanaha la qabto, ama loo yeero inuu qasab ku yimaaddo maxkamadda (summoned) habka maxkamaddu wuxuu noqon doonaa sida soo socota: (Fiiri bogga 11 ee sawirka)

### 1. Maxkamad-saaridda (Arraignment)

- Eedeysanuhu wuxuu sheegtaa bareerihisa (plea) (oo marxalladan inta badan waa "Maya, Dembi Ma Qabo").
- Guud ahaan dhibbanayaashu waa inay joogaan waqtigaas si ay u codsadaan amar illaalineed 'protection order' (fiiri bogga 16). Guud ahaan amar illaalineed waa la helaa xaaladaha budhcadnimada guriga iyo daba-galka. Haddii dhibbanuhu aanu rabin amar illaalineed, qasab maaha inuu yimaaddo waqtiga maxkamadda-saaridda.
- Xaakimka ayaa sheega qaddarka damiinka 'bond'. Eedeysanuhu waxa laga yaabaa inuu ka baxo ama aanu ka bixin jeelka.
- U-dooda sharciga ah ayaa jooga si uu adiga kuu caawiyo.

**U-FIIRSO: Kala xiriir VINE wixii macluumaad ah ee ku saabsan xirniinka eedeysanaha.**

### 2. Shirka Dacwad-qaaddidda Ka-hor (Pre-trial Conference)

- Kiiska waxa lagu qorayaa xaakin joogta ah.
- Dhibbanaha waxa laga codsanayaa inuu yimaaddo, laakin xaaladaha qaarkood waxa laga yaabaa in dacwad-ooguhu talafoonka ag joog ku yiraahdo.

- Dacwad-oogaha iyo looyarka difaaca ah ayaa is-dhaafsada macluumaad iyo caddeymo.
- Eedeysanuhu wuxuu qiran karaa dacwadda orijinaalka ah ee lagu soo oogay ama mid taas ka yar oo waa la xukumi karaa. Haddii aan xilligan wax xaal ah la gaarin, kiiska waa la sii wadi doonaa ama dib baa loo dhigi doonaa.

### 3. Dacwad-qaaddid (Trial) /Bareere (Plea)

- Kiiska wuxuu u guddi karaa dacwad-qaadis halkaas oo xaakin ama guddi xeerbeegti ah 'jury' ayaa dhageysta dhammaan caddeymaha, oo go'aamiya in eedeysanuhu dembiga qabo ama aanu qabin.
- Eedeysanuhu xiligan wuxuu qiran karaa dembiga oo wuu iska dhaafi karaa xaqa uu u leeyahay dacwad-qaadista.
- Kiiska dhawr waqti baa dib loo dhigi karaa xilligan.
- Inta badan dhibbanuhu waa inuu dacwad-saaridda ka markhaati furaa.
- Dhibbanuhu maaha inuu markhaati furo haddii heshiis qirasho la gaaray. Dhibbanaha waxa loo sheegi doonaa dhammaan wada hadallada iyo heshiisyada qirashada.
- Dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu goob joog ahaado xiliga qirashada oo uu maxkamadda u sheego Oraahdiisa Raadreebka Dhibbanaha (Victim Impact Statement).

### 4. Xukunka (Sentencing)

- Dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu maxkamadda wax u sheegto xilliga dhageysiga xukunka.
- Xaakimka ayaa go'aamiya ciqaabta uu saarayo eedeysanaha. Ciqaabtaas oo noqon karta min sii-deyn shardi leh 'probation' illaa ganaax ama jeel, kolba sida uu yahay dembigu.


### 5. Racfaan (Appeal)

- Eedeysanaha iyo looyarkiisa ayaa laga yaabaa inay marar xadiddan racfaan ka qaataan xukunka maxkamadda. Inta badan lama arko racfaan kiisaska dembiyada yaryar.
- Haddii uu eedeysanuhu aqbaloo heshiis qirasho, caadi ahaan wax racfaan ihi ma jiro.


**Xusuuso** - U-dooda sharciga ah ayaa jooga si uu adiga kaaga caawiyo habka.

**FIIROOYIN GAARA:** Dacwad-oogaha oo qura ayaa go'aan u leh inuu eedeymaha tirtiro. Adigu shaqo kuma lihid inaad go'aan ka gaarto in eedeymaha la tuuro ama la tirtiro. Fadlan u diyaargarow inaad sugto. Waxa jira kiisas badan oo ka jira maxkamad kasta maalin kasta. Waxa laga yaabaa inaad hal-kan joogtid saacado dhawr ah ee u diyaargarow sidaan (kugulama tallineyno inaad gaariga dhigato baarkinka waqtiga la xisaabiyo, sababtoo ah waxa laga yaabaa in tigidh lagu jaro). Inaad soo qaadatid wax aad akhrisatid waa fikrad fiican.

## KIISASKA DEMBIYADA YARYAR



## KIISASKA DEMBIYADA WAAWEYN



## TALAABOOYINKA DACWAD-OOGIDDA DEMBI WEYN 'FELONY'

Dacwooyinka dembiyada waaweyn waxa soo ooga booliska. Dembiyada waaweyn waa kuwo aad u kakan oo keeni kara in eedeysanaha xabsi loo diro.

Kiisaska dembiyada waaweyn waxa dacwadda ku soo ooga:

Dacwad Oogaha Degmada Franklin County,  
373 S. High St., 14<sup>th</sup> Floor  
Columbus, OH 43215  
(614) 525-3555

[www.franklincountyohio.gov/Prosecuting\\_Attorney](http://www.franklincountyohio.gov/Prosecuting_Attorney)

Haddii aad booliska kala xiriirtid arrin dembi weyn ah, inta badan boolisku wuxuu u xilsaari doonaa baare dembi inuu cabashada soo baaro. Marka uu dembi baaruhu rumeysto inay jirto caddeyn ku filan, wuxuu kiiska hordhigaa Dacwad-oogaha Degmada Franklin County. (Fiiri bogga 12 ee sawirka)

### 1. Guddiga Xeerbeegtida ee Weyn (Grand Jury)

- Dacwad-oogaha Degmada Franklin County wuxuu macluumaadka booliska soo hordhigaa Guddiga Xeerbeegtida ee Weyn oo gaara go'aan in la xareeyo dacwad weyn iyo in kale.
- Waxa laga yaabaa in eedeysanuhu uu xilligan jeel ku jiro haddii boolisku warqadda qabashada 'warrant' xareeyey.
- Waxa laga yaabaa in dhibbanaha laga rabo inuu markhaati ka furo dhageysiga Guddiga Xeerbeegtida ee Weyn.
- Guddiga Xeerbeegtidu uma furna dadweynaha oo macluumaadku waa sir. Eedeysanuhu ma joogo markaas.
- Haddii aan eedeysanaha hore loo qaban, waxa laga yaabaa in warqadda qabashada loo qoro ka-bacdi dhageysiga Guddiga Xeerbeegtida ee Weyn.

### 2. Maxkamad-saaridda

- Eedeysanuhu wuxuu sheegtaa bareerhiisa (oo mar kasta ah 'Dembi Ma Qabo').
- Waxa la codsan karaa Amar Illaalineed (fiiri bogga 16).
- Xaakimka wuxuu sheegaa qaddarka damiinka 'bond'. Eedeysanaha waxa la yaabaa inuu ka baxo ama aanu ka bixin jeelka.

**U-FIIRSO: La xiriir VINE wixii macluumaad ah ee ku saabsan xirniinka eedeysanaha.**

### 3. Shirka Dacwad-qaaddidda Ka-hor

- Xaakimka Dacwad-saaridda ayaa laga yaabaa inuu qabto ballan shirka dacwad-qaaddidda ka-hor inuu la kulmo dacwad oogaha iyo looyarka difaaca inay ka wada hadlaan kiiska.
- Inta badan Dhibbanaha lagama rabo inuu goob joog ahaado.

### 4. Dacwad-qaaddid/Bareere

- Kiisku wuxuu u gudbi karaa dacwad-qaadis halkaas oo guddi xeerbeegi ah 'jury' ama xaakin ayaa dhageysta dhammaan caddeymaha, oo go'aamiya in eedeysanuhu dembiga qabo ama aanu qabin.
- Dhibbanaha waxa laga yaaba in laga codsado inuu yimaaddo, laakiin xaaladaha qaarkood waxa laga yaabaa inuu dacwad-ooguhu ku yiraa talafoonka ag joog.
- Inta badan waa inuu dhibbanuhu markhaati ka hor furaa dacwad-qaadista.
- Dhibbanuhu maaha inuu markhaati furo haddii heshiis qirasho la gaaray. Dhibbanaha waxa loo sheegi doonaa dhammaan wada hadallada iyo heshiisyada qirashada.
- Dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu goob joog ahaado xiliga qirashada oo uu maxkamadda u sheego Oraahdiisa Raadreebka Dhibbanaha.

**FIIROOYIN GAAR AH:** Waxa laga yaabaa in la qabto taariikho badan oo dacwad-qaadis ah. Sii waddidda dacwadu waa wax caadi ah oo waxba kama sheegeyso xoogga ama muhimadda kiiska. Inta badan, taariikhda dacwad-qaadista waa la sii wadi doonaa si ah ujeed-dooyinka jadwalka.

### 5. Baarista Xukunka Ka-horreysa (Pre-Sentence Investigation) (P.S.I.)

- Warbixin ah baaris xukunka ka-horreysa ayaa marmar la diyaariyaa si xaakimka loo siiyo macluumaadka loo baahan yahay sidii si sax ah loogu xukumi lahaa eedeysanaha. Dhibbanuhu waxa laga yaabaa inuu warbixinta ku darsado oraahda saameynta dhibbanaha.



## 6. Xukumidda

- Dhibbanuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu maxkamadda hor dhigo qoraal ahaan ama af ahaan oraahda saameynta dhibbanaha marka dhageysiga xukunku dhacayo. Kaaliyaha Markhaatiga Dhibbanaha ah ayaa adiga kaa caawin kara diyaarinta oraahda saameynta dhibbanaha.
- Xaakinka ayaa go'aamiya ciqaabta uu saarayo eedeysanaha. Ciqaabtaas oo noqon karta min sii-deyn shardi leh 'probation' illaa ganaax ama jeel, kolba sida uu yahay dembigu iyo xaalado kale.

## 7. Racfaan

- Haddii eedeysanaha lagu helo inuu dembiga qabo 'guilty', Eedeysanaha iyo looyarkiisa ayaa laga yaabaa inay racfaan ka qaataan go'aanka maxkamadda iyo/ama xukunka maxkamadda.
- Haddii uu eedeysanuhu aqbaloo heshiis qirasho, caadi ahaan wax racfaan ihi ma jiro.

### FIIROOYIN GAARA:

- Xusuuso – kaaliye markhaati dhibbane ah ayaa joo-ga si uu adiga kaaga caawiyo dhammaan habkan.
- Dacwad-oogaha oo qura ayaa go'aan u leh inuu eedeey-maha tirtiro. Adigu shaqo kuma lihid inaad go'aan ka gaarto in eedeymaha la tuuro ama la tirtiro.
- Fadlan u diyaargarow inaad sugto. Waxa jira kiisas badan oo ka jira maxkamad kasta maalin kasta. Waxa laga yaabaa inaad halkan joogtid saacado dhawr ah ee u diyaargarow sidaas (kugulama talli-neyno inaad gaariga dhigato baarkinka waqtiga la xisaabiyo, sababtoo ah waxa laga yaabaa in tigidh lagu jaro). Inaad soo qaadatid wax aad akhrisatid waa fikrad fiican.

## AMARRADA ILLAALINTA

Dhibbanayaasha noocyo ka mid ah dembiyada gacan saarka ah waxa laga yaabaa inay u qalmaan amar illaalin ah (protection order). Amarka Illaalintu waa amar aan joogto ahayn oo loogu tala-galay inuu amaan iyo illaalin siiyo dhibbanayaasha dembiyadda waaweyn qaarkood.

### Waxa jira afar nooc oo ah Amarro Illaalineed oo boolisku fulin karo:

1. Amarka Illaalinta Ku Meel Gaarka ah ee Budhcadnimada Guriga (Domestic Violence Temporary Protection Order) (DVTPO)
2. Amarka Illaalinta ee Dembiga Weyn (Criminal Protection Order) (CrPO)
3. Amarka Illaalinta ee Rayidka (Civil Protection Order) (CPO)
4. Amarka Illaalinta Dembiilaha Daba-galka Galmada U-xagliya (Stalking Sexually Oriented Offender Protection Order) (SSOOPO)

### FIIROOYIN GAARA:

- 'Amarka Ka Fogow' (Stay Away Order) oo ah xujo ku xiran damiinka MA KARO inuu fuliyo boolisku, waxa fulin kara oo qura xaakinka bixiyey amarkan.
- Amarrada Ka-celinta (Restraining Orders) ee lagu bixiyey kiisaska furriinka MA KARO inuu fuliyo boolisku.
- Waa inay jirto eedeeyn dembi in la xereeyo codsiga amarka DVTPO ama kan CRPO. Dacwad-oogaha ayaa adiga ku matali doona inaad heshid amarka DVTPO ama CRPO.
- Maaha in eedeymo dembi la xareeyo si lo helo amarrada CPO ama SSOOPO. Looyar looma baahna, balse waxa lagugula talinayaa inaad heshid wakiilni-mo sharci si aad u codsatid amarka CPO ama kan SSOOPO.
- Lacagta fiiga amarrada lagama qaado Amarrada Illaalinta.
- Haddii aanad hubin inaad u qalanto ama aad wax su'aal qabtid, waxaad la xiriiri kartaa u-doode jooga Xafiiska Qareenka Magaalada ee lambarka (614) 645-6232 ama Xafiiska Dacwad-oogaha Degmada ee lambarka (614) 525-3555.



Marka la bixiyo Amar Illaalineed, ee deysanuhu adiga kulama soo xiriiri karo, xitaa haddii aad adigu sidaas u oggolaatid. Xaakin oo qura ayaa beddeli kara shuruuddaha iyo xujooyinka Amarka. Amarka Illaalinta waxa loogu tala-galay dadka amaankooda u cabsi qaba. Eedeysanaha waa la xiri karaa haddii uu jabiyo Amarka Illaalinta.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan Amarrada Illaalinta ee Dembiyada ama Rayidka ah, fadlan waxaad wacdaa Unugga Budhcadnimada Guriga iyo Dabagalka ee Xafiiska Dacwad-oogaha Magaalada Columbus ee lambarka (614) 645-6232.

**Marka aad haysatid Amarka Illaalinta**

- Waxaad hubisaa inaad adigu haysatid koobbi ah Amarka Illaalinta waqti kasta!
- Dhab ahaan wax xiriir ah ha la yeelanin eedeysanaha illaa uu kiisku ka dhamaanayo.
- Ha tagin meesha uu joogo eedeysanuhu ama goobaha laga yaabo inuu/inay joogo/joogto.
- Eedeysanaha ha ku marti-qaadin gurigaaga ama inuu kugula kulmo meel kale.
- Koobbi ah Amarka Illaalinta gee saldhigga booliska ee xaafad-daada si ay uga warqabaan mashaakilka iman kara.
- Beddel qufullada albaabkaaga oo xiro albaabada iyo daaqaadaha.
- Ulo adag geli daaqaadaha iyo albaabada riixma.
- U dig jiiraankaaga, dadka aad la shaqeyso, dugsiyada iyo xarumaha xannaanada ilmaha inay wacaan booliska haddii eedeysanaha lagu arko gurigaaga, shaqadaada, ama dugsiyaga.
- Qof ha kula joogo adiga, haddii la kari karo.
- Keligaa dibadda ha u bixin.
- Xasusnow in markaatiyaashu ay aad muhiim u yihiim yihiin. Dad ag joog mar kasta oo aad kari kartid.

**U-doode (kaaliye Markhaati Dhibbane ah) (Victim Witness Assistant):** Waa shaqaale ka tirsan xafiiska dacwad-oogaha oo dhibbanayaasha ka caawiya inay dhex mushaaxaan habka maxkamadda.

**Maxkamad-saarid (Arraignment):** Waa hortagga koowaad ee eedeysanaha si rasmi ah loogu oogeysiyo dembiyada isaga/iyada lagu soo eedeeyey. Maxkamadda sameyneysa maxkamad-saariddu waa meesha lagu qabto damiinka koowaad ama wax looga beddelo oo Amarrada Illaalintana waa lagu bixin karaa.

**Lacagta Damiinka (Bond):** Xiritaanka ka bacdi, xaakin ayaa go'aamin doona lacagta damiinka si loo hubiyo in eedeysanuhu maxkamadda yimaaddo. Waxa jira 3 nooc oo damiin ah:

Damiinka Joogitaanka ee Aan Deebaajiga Laheyn (Recognizance/ Unsecured Appearance Bond) (ROR) – wuxuu eedeysanaha u oggolaadaa inuu jeelka kaga baxo ballan qaad saxeexiisa/saxeexeeda ah.

Damiinka Joogitaanka ah (Appearance Bond) – eedeysanuhu waa inuu maxkamadda siiyaa boqolkiiba 10% lacagta damiinka oo lagu daray fiiga maxkamadda inta aan la sii deynin. (Tusaale ahaan, haddii uu damiinka joogitaanku ahaa \$1500 oo doolar, waxa la rabaa inuu bixiyo uga yaraan \$170 doolar – kaas oo ay ku jiraan \$20 doolar oo ah fiiga maxkamadda – si uu jeelka uga baxo.)

Damiinka Kaashka/Deebajiga leh (Cash/Surety Bond) – eedeysanuhu waa inuu kaash ahaan ku bixiyaa dhammaan qaddarka damiinka ama uu kireystaa wakiil damiin ah (bondsman) (fiiga wakiilka damiinka ah waa boqolkiiba 10% ee lacagta damiinka oo lama soo celin karo).

**Cabasho (Complaint):** waa oraaah dhaareed oo rasmi ah oo sheegaysa dembiga laga galay sharciga ee lagu qabtay eedeysanaha.

**Sii-wadid ama la sii-waday (Continuance/Continued):** Waa dib u dhigga dhageysi maxkamadeed ee maalin kale. (sida “Kiiska waa la sii wadi doonaa”).

**Dacwad-qabasho Maxkamadeed (ama Kursi) (Court/Bench Trial):** Waa dacwad-qabashada lala hortago xaakin, ee aan lala hortagin guddi xeerbeegti ah.

**Eedeysane (Defendant):** Waa qofka dacwadda lidka ku ah lagu soo oogay.

**Looyarka Difaaca (Defense Attorney):** Waa looyarka loo qabto ama loo maga-caabo inuu matalo eedeysanaha (wuxuu noqon karaa mid dawladda ah ama mid birifaati/gaar ah).

**Caddeymo (Evidence):** Waa wax kasta oo la tuso maxkamadda oo lagu taageero kiiska. Waxa ka mid noqon kara dhageysiga dhibbanaha, eedeysanaha ama markhaati kale, dhokumanti, sawirro, waxyaalo dhar ah, hub, ama rikoorada booliska ama caafimaadka.

**Guddiga Xeerbeegtida Weyn (Grand Jury):** Waa koox dad ah oo eega kiisas loo keenay dacwad oogidda dembi weyn. Wadahadalkoodu waa sir oo wuu ka xiran yahay dadweynaha.

**Dacwad Oogid (Indictment):** Waa eedeymaha rasmiga ah ee dembiga weyn ee ay soo gaaraan Guddiga Xeerbeegtida ee Weyn. Laga yaabo inuu yahay hal eedeyn ama ka badan – eedeyn kasta waxa la dhahaa ‘tiro’ (count).

**Dambiile (Offender):** Waa qof ay khuseyso dacwadda dembiga weyn.

**Barnaamijka Magdhowga Dhibbanayaasha Dembiga ee Ohio (Ohio Victims of Crime Compensation Program):** Waa barnaamij uu dhibbanaha dembi weyn laga yaabo inuu ku codsado in kharashkii ka baxay loogu soo celiyo (sida biilasha caafimaadka, lacagtii shaqada ee dhaaftay, khasaare walxood, ama kharash la-talineed) kuwaas oo ku yimi dhibta dembiga weyni keenay. (1-800-584-2846).

**Heshiiska Qirashada (Plea Agreement):** Waa marka uu eedeysanuhu oggolaado inuu qirto dembiga (plead guilty), inta badan eedeeyn tii hore ka yar, si uu uga fogaado maxkamadeyn.

**Dhageysi Hor-dhac ah (Preliminary Hearing):** Waa dhageysi lagu go'aaminayo haddii ay jiraan caddeymo ku filan in hore loo wado dacwad oogidda dembi weyn.

**Sabab Dhici Karta (Probable Cause):** Waa muujin ka horreysa dhacwad-qaadista oo ah inay jiraan caddeymo ku filan oo ku lid ah eedeysanaha oo kiiska lagu sii wadi karo.

**Kantaroolka/Komuyuunatiga (Probation/Community Control):** Waa shuruud la xiriiirta xukumidda oo eedeysanaha ku qasabta inuu iska soo xaadiriyo sarkaalka 'probation'ka, oo uu raaco amarrada uu bixiyey xaakinku, (tusaale ahaan: inuu ka qeybgalo la-talin, inuu shaqo haysto, inuu iska baaro daroogo iyo khamri) si uu jeelka ama xabsiga uga maqnaado.

**Dacwad-oogaha (Prosecutor):** Waa qareenka matala Dawladda Ohio ee kiis dembi weyn.

**Baarista Ka-horreysa Xukunka Maxkamadda (Pre-sentence Investigation) (P.S.I.):** Waa warbixinta ay bixiso Waaxda 'Probation'ku si ay xaakinka u siiso macluumaad uu u baahan yahay inuu ku xukumo eedeysanaha.

**SANE (Sexual Assault Nurse Examiner) (Kalkaalisada Baaraha Weerarka Galmada):** Waa kalkaaliyaal si gaara loogu tababaray kalkaalisanimada dembi-baarista (forensic nursing) iyo aruurinta baakooyinka caddeymaha weerar galmo.

**Yeeris Maxkamada (Subpoena):** Waa amar maxkamadeed oo ah in dhibbane ama markhaati uu hor yimaaddo maxkamad.

**Amar Imaansho Maxkamad (Summons):** Waa amar maxkamadeed oo ah in eedeysane uu hor yimaaddo maxkamad.

**Dacwad-qaadis (Trial):** Waa halka eedeysanuhu geesto kiiskiisa sk loogu hor dhageysto guddi xeerbeegti ama xaakin.


**VINE (Victim Information & Notification Everyday) (Macluumaadka Dhibbanaha & Oggeysiinnada Maalin Kasta ah):** Waa adeeg talafoon otomaatik ah oo bilaash ah oo dhibbanaha dembiga weyn u oggolaanaya inuu helo macluumaadka eedeysanaha 24 saac maalintii. Dhibbanayaashu waxay kaloo diiwaangelin karaan lambarrada talafoonnadooda si qarsoodi ah barnaamijka 'VINE' si loo soo oggeysiyo marka ay wax iska beddelaan heerka eedeysanaha. (1-800-770-0192).

**Amar Qabasho (Warrant/Capias):** Waa erayo loo isticmaalo amar uu bixiyey xaakin marka aanu eedeysanuhu hor imanin maxkamadda.


Buug-arahan waxa ku jira maabka dhismaha weyn ee maxkamadda Degmada Franklin County courthouse (bogga 21) iyo maab tusaya magaalada hoose (bogga 22). Waxa jira baarkin ku wareegsan dhammaan dhismaha weyn, iyo basas badan oo dhismaha yimaadda.

- Waxa jira dhawr garaash oo baarkin ah oo dhismaha ku dhow. Garaashka Guddiga Degmada Franklin County waxa laga geli karaa waddada 'Mound St.' ama 'Fulton St.' Garaashka Xarunta Rumaanka Dhallinyarada (Juvenile Detention Center Garage) waxa laga geli karaa waddada 'Front St.' Garaashka Baarkinka ee 'City Center' isna wuu dhow yahay, oo waxa laga geli karaa waddada 'Main St.' ama 'Rich St.' Hilitaanka baarkinka ee dhammaan garaashyadan waa mid xaddiddan.
- Haddii aad gaari dhigato baarkin, waxaad oggaataa in qiimaha baarkinnadu ay kala duwan yihiin. Waa inaad hore u soo qaadataa kaash dheeraad ah oo waa inaad isa siisaa waqti badan oo aad ku lugeyn karto ama kaga soo lugeyn karto dhismaha maxkamadda.
- Isticmaalka baarkin mitir xisaab ah le lagugulama talinayo, sababtoo ah waxa hubaal ah inaad saacado badan aad joogi doonto dhismaha maxkamadda, oo waxa laga yaabaa inaad awoodi weydo inaad dhismaha ka soo baxdo si aad mitirka lacag ugu shubto.
- Wixii macluumaad baska ah, waxaad wacdaa COTA ee lambarka (614) 228-1776.
- Haddii aadan hubin halka aad tageyso marka aad timaaddo dhismaha maxkamadda, waxaad weydiisaa Miiska Macluumaadka ee halka hore ku yaalla.

**U-FIIRSO: Dhismaha Maxkamaddu waa dhisme amaan ah. Adiga laguuma oggolaanayo inaad soo gasho haddii aad haysatid wax hub ah ama walxo loo isticmaali karo hub ahaan.**



FRANKLIN COUNTY GOVERNMENT COMPLEX



1. 'Franklin County Common Pleas Courthouse', 345 S. High St.
2. 'Juvenile Detention Center & Parking Garage'
3. 'Franklin County Corrections Center I'
4. 'Franklin County Courthouse', 373 S. High St.
5. 'Pavilion'
6. 'Hall of Justice', 369 S. High St.
7. 'Atrium'
8. 'Franklin County Municipal Court', 375 S. High St.
9. 'James A. Karnes Building', 410 S. High St.
10. 'Commissioners Garage'

Hay'adda \_\_\_\_\_

Wakiilka

Hay'adda \_\_\_\_\_

Talafoon Lambarka \_\_\_\_\_



Waxaad xasuusataa in aanad adigu keligaa ahayn. Waxa jira meelo aad adigu caawimo u raadsan kartid haddii aad tahay dhibbane weerar galmo, budhcadnimo guri, ama daba-gal. Dhibbanayaasha dembiga weyn waxa si xoog leh loogu dhiir-gelinayaa inay kala xiriiraan hay'adaha lagu sheegay buug-yarahan wixii caawimo ah, ee macluumaad buuxa ah, iyo agabyada dirista ee komuyuunatiga.

**BUUG-YARAHAN WAXA FAN-GAREEYAY  
SHARCIGA KA HORTAGGA GACAN-SAARKA  
HAWEENKA EE 'FY 2011' OO AY ANSIXIYEEN  
XAFIISKA KA HORTAGGA GACAN-SAARKA  
HAWEENKA IYO GUDDIGA SARE EE DEGMADA  
FRANKLIN COUNTY.**

**MAHADNAQ GAAR AH WAXA ISKA LEH WAKIILKA XAFIISKA  
DEGMADA FRANKLIN COUNTY EE QAREENKA DACWAD-  
OOGAHA RON O'BRIEN, QAREENKA MAGAALADA  
COLUMBUS RICHARD C. PFEIFFER, SARNCO, CHOICES,  
IYO KILINIGA U-DDDDIDDA QOYSKA EE 'CAPITAL  
UNIVERSITY LAW SCHOOL' WIXII KAALMO AH EE AY  
KA GEESTEEN DIB-U-FIIRINTA IYO DIB-U-QORISTA BUUG-  
YARAHAN.**

**LA NAQTIIMAY, 2012**